15 - GEED QORID

Fiqi

Mawduuc baanu halkan ka sii wadi doonnaa hore waa u jiri jijiray, haatanna aanu qayb ka geli doonnaa, waxaa jooga rag fara badan oo uu ka mid yahay Cabdi Dhegaweyne, Sheekh Abuu, Salaad, Ciise oo qabiye iyo hogaamiye iyo hadalkaba qaybo ku leh, Fiqiburaale oo aad hadda hadalkiisii maqalaysaan, macduuca oo aanu ka hadlaynaan maanta waxaa weeye oo ugu horeeya “Qaybta qoraalka” la yiraahdo, gaar ahaan waxa wax lagu gooyo, oo ugu horeeya marka geedka la gooynaayo, magacyadooda, marka geedka la soo gooyo, wixii lagaga tifaftiro oo lagaga gooyo kurtimada, laba iyo wixii lagu oo cashaan diirka iyo isku dubaridka gelaaya iyo wixii la xulbaayo oo calaashaan halkaas iyadoo qayba badan birtaas ay geli doonto, magacyadooda, ee sidaasaanu u wadi doonnaa, mawduuca inoogu xigaana haddow dembi, oo gaar ahaan miyigana ku dambeeyay oo qaybahaana wax ka qaata ee nooc kastaba ha ahatee, Cabdi tafadal

Dhegaweyne

Fiqiburaalow dhirta waxaa lagu gooyaa dhirta isku adayg ma aha, dhir badan baana wax laga qortaa, waa kala adag tahay dhirtu, lebigaaba ku jira oo dhir aan waxbaba karinoo lagu dhimanaayo faraha ay gooynaysaa jirta. Marka ama jilib ha noqoto ninkii haysta Soomaalida, ama godin ha noqoto ee bir shey adag, oo godin adag ah yaa lagu goynayaa, oo waa jilibtii masaartaa jilib la yiraahdaa, ama mansaar iyo jilib oo isku mid ah, ama masaariyo godin, saddexdaasaa mid lagu gooynayaa, waa lagu kala furayaayoo markadhulka loo rido, labada madaxna waa laga jarayaa, intii uu qorayey buu ninku qiyaas anayaayoo ku le ekeysiisanayaa gudin la yiraahdo, aan gudin waaweyna ahayn kuwa yar yarn ahaynoo Faago la yiraahdoo lagu faago, yuu la dhacayaayoo marka hore korkeeda markuu godintaa ku tumo weska dhigayaa. Godin qoraar la yiraahdo ta wax ku qortoo qoraar qor la yiraahdoo oo qoraarba la yiraahdo yuu ku qorayaayoo, tan qortada ah, taa markuu ku simo ee intii korkii iyo ku dhameeyo habkii qiyaasoo qiyaastii oo danna hagaajiyo, oo calalkii u haray, illeyn isagii waa la coldhayaaye; godin colodho la yiraahdo magaceeda oo afyaroo dhuuban lahoo, tii hore ka afdheeroo colodho la yiraahdo, yaa lagu coldhayaa, marka taa lagu coldho ee afkii la weyneeyo, quraartii baa haddana dee waa gelaysaa ileyn awal ma gelinee markan waa gelaysaaye; quraartii baa haddana lagu celinayaa, marka hore quraar, meesha af gumaaxanoo siman oo mindi lagu xaabiyay oo weelkii isagana isaga oo aan la waxeeyhoo la xurdinba yaa qolkiisii la hagaajinayaa oo korka la hagaajinayaa oo mandiil lagu xaabinayaa iyo salkii hoosaba la hagaajinayaa, marka hadduu doono ninkii qorigayaqaana wuxuuba la dhacayaa hamkii la coldhayoo wax lagu shubanaayay qoraartii buu la dhacayaa oo wax ku qoray. Markuu meel yaroo god ah oo saas oo kale ah ka same eyo oo u sameeyoo u dalooliyo, yuu coldhadii la dhacayaa; dhig!dhig!dhig!colodhadaasuu ilaa salka wadanayaa, oo geleysa hadhowna intii xaadhinkani ay u gelayso, gudintii qaraarta ahayd buu gelinayaa, buu qorayaa wuu ku simayaa waxa la wadaba markii dambe xaleefataa loo sameeynayaa saa loogu qabto lagu maroojinayaa, taasaa halkaas oo kale ka dhigaysaa ee weelka zaleefsatada ah, markaa tii ______ qarka loogu hagaajinayey, iyo xaleefs tadaasaa u dambeynaysa oo xaal baa la yiraahdaa oo dhamaan qoraalkii, war waan yar xaal

xaalayaa buu oranayaayoo, mindiishana saasuu wax ku oranayaa meeshii wax ku yara jirana, xaleefsatadaana waa ku xaleefsateynayaa oo waa ku shubayaa markaa asal la gelinayaa asalka marka la geliyo yaa xoolihii lagu maalayaa inta la __________ iyo wax la mariyo.

Fiqi Waa tahay ee cabdi Dhegaweyne wuxuu taataabtay qoraalkii qayb ka mid ah gaar ahaan magacyada wax lagaga qabto, weelka la qoraayo nooc kastaba ah ahaadeene saas awgeed halkan waxaa iiga muuqda Salaad oo isagana aan filaayo inuu qayb ku dari doono bal Salaadow adiguna wixii la dhaafay ee ka dhiman geedkaas qoridiisa iyo waxa lagu gooyaba, wixii aad ku dari lahayd; tafadal/:

Salaad Mahadsanid Xaaji Ibraahim, een horta sida Cabdi u sheegay biraha lagu gooyo, horta birtaan waxaa jira geed la yiraahdo waana isku asagii oo midna masaar yiraaho, waa isku mid waana magacna waa la yiraahdaa, masaarna waa la yiraahdaa, oo waa jiraa waa lagu gooyaa geedaha gudinna waa taqaaniinnoo, kulligayaga waa naqaannaa oo waa lagu gooyaa hayeeshee geedka qoriddiisii marka ay tahaymiddi marka ugu horreysa horta waxaa lagu qoraa bahalkii godin yar oo la yiraahdo geeda qor oo afka saa u jirdaacan yahay oo soo godan yaa lagu qoraa, markii lagu qorihayo marka laba ka saddex kale yaa raacda, saddexdaas mid waa middaas, ninkaan leeyahay colodhana waa la yiraahdaa xaleefatana waa la yiraahdaa, saasay u soo godantahay, midi geed daab ahay leedahay oo dheer bey leedahay oo dheer oo dheer oo intaa jeeday leedahay, labadooduna midna weelkuu dhow yahay oo illaa weelka gudihiisa waa sii dheeraanayaayedhowyahaa lagu qoraa, midna markii weelku fogaado ayaa lagu qoraa, marka waxaa jira geed kaloo __________ la yiraahdo oo asagu waa toosan yahay waxbuuna waana go’an yahay waa geedka geedka dhan sina ul-sabiile baa la yiraahdaa, wuxuu wataa bir, waa bir intaa le’eg waxay ku daabantahay, ushaas oo kalay ku daabantahay, marka sasaa lagu yiraahdaa geedkaa;riin!riin!riin!baa lagu siinayaa, asagaa lagu siinayaa, kasaa sina oo saasaa lagu siiyaa oo asaga saasaa lagu waxee yaa, haddee dhulka oo dhan ku soo wada ________ ma naqaanee, uun yacnii intaan anigu ka arkay yaan idiin sheegayaa, marka saasaa asagana lagu siiyaayoo qori geeska dhan buu saxaa, oo waxaa dhan oo wax saxa waa midkaas oo labadaan iyo waxay gooyaan maahine geeka wax saxa oo ______ muxuu ahaa markaas nagta ka dhiga waa midlkaas kanna intasa ka aqaannaa.

Geedaha markaan goyntodii; min kale, geed kale oo anga hadda markiihore aan nagu badnaan jirinoo, marka af ajnabi addii lagu yiraahdo ____ oo asagana _____, asagana waa lagu gooyaa geedka daran oo dhan oo dhirta badan waa lagu gooyaa, bal hadda intaasaan ka garanayaaye haa! Aw Xaaji Ibraahinow!

Fiqi Waa tahay weli hawshii wey inoo socotaa, ee qaybaanu marnay, hase ahaatee waxa la yiri “Haddaan la rog rogin rag baan helin” Bal waxaan yeelaynaa ee waxyaabaha ka dhiman waxaa aanu soo sheegnay, maxaa yeeay Soomaalidaa waxay tiraahdaa. Hadal ninkii badiyaana ma wada oran, kii yareeyana kama wada tegin; Ayadoo sidaas tahay bal waxaa ka dhiman intasa aynu soo marnay Sheekh abooki yaan imminkana u gudbinayaa oo isagana caan ku ah dhirtaas iyada ah ama

qoraalka addii Ilaahay yiraahdo, Xaaji Abooke tafadal.

Sh.Abuu Haa ee maalin wanaagsan, waad mahadsantahay Fiqiburaale, XaajiFiqiburaale, ee aniga in yar baa in aan ku kordhiyo, rabaa ee rag badan baa wax soo sheegay, aniga waxaan rabaa intii in aan ku kordhiyo, inaan meeshii ka caddeeyo aan ka sheego, waxaan meeshaan ka sheegaa, tan geedka qorka, tan la adeegsado geeda qorka mid waxaa la yiraahda haddiiba geedka la soo gooyo waa iska caan horta misaar baa lagu soo gootaa, markii la keeno waxaa lagu ageedsadaa lagu qoraa wax la yiraahdo yacni qoromo, qoromo; waa geedsaa u dheeroo saas u qaloocanoo, haddii haddana hax afka bir yar loogu suraayo aa geedkaasaa lagu jukeynaa, geedkii lagu duleeliyaa, qoromo aan niraahnaa taas baa lagu duleeliyaa, qoromadaas markii la dhaameyo waxaa la yiraahdaa bacdi waxaa jirta, mindi oo qaloocan oo lagu hoolhoolayo, tan kale waxaa la yiraahdaa shocko, shookadaas waa tii hadda ee aan Salaad u sheegayey waa ku bedelantay ee sidii an u naqaano ama loo yaqaano waa shocko, waa lagu hoolaa markii laga dhameeyo shookadaas baa la gelinayaa shookadaas haddana waa lagu hoolaa markii laga dhameeyo shookadaas baa la gelinayaa shookadaas haddana waa lagu sinsimaa lagu simaa, waa saxaysaa shooko, marka shookadaas iyo mindida yar baa geedkii ka soo baxayaansa geedkii lagu qoraa si kasta ha u yaraado ama ha u weynaado, markii oo misaarta la gu soo gooyo, qorimadaas geedka lagu duleeliyo, shookadaasaa lagu duleliyaa, mindidaas qaloocan baa lagu simaa, lagu xoog xoogiyaa, lagu xaagxaagiyaa ee aad iyo aad baa yacnii geedka ha yaraado ha weynaado wixii lagu duleelinaayo mise wixii la qoraayo oo la adeegasado, sidaas baa adiga e la yiraahdaa? Waxaa kale kuu soo heri ee la adeejiyo geed la yiraahdo ee mindi, bir lagu suubiyo oo lagu sameeyo gemberkii lagu fadhiisto usaana dhinacoo loogu fadhiistaa dhinacoona ee birbaa lagu sameeyaa, marka geedkaas nooc kastaa lagu adeegsan karaa, waxaa la yiraahdaa “Qumbe qore” qumbe qore, usaana lagu fadhiisiyaa, biraa ku suran, markaas baa la adeegsadaa, geedihii xataa waa lagu xaaxaabin karaa, geedihii la soo qori waa lagu dhamaystiri karaa, usoo lagu fadhiyo qaarna waa lagu shaqaysan karaa. Ee qumbaha dhexdiis wixii ku jira yacnii waa la qoraa qumbe qoraa la yiraahdaa, ee waxbadan baa lagu adeegasan karaa kaas usuuna waa wax la adeegsado, wax qoraalkana ka mid ah, marka ee waa iska fara badan yihiin; mindidaan yar yar ah oo kala jaad jaad ah, ayaa jiraan, weelasha yaryar markii in aan la soo dhamayn weelasha yar yar ah, mid yacni oo qaloocan, mid iska toosan, laakiin kulligooda daab bey leeyihiin, markaasaa een lagu xaagxaagiyaa weelasha yaryar oo qaloocan, oo ama toosan baan u leeyahay, weelka yaryar oo lagu sameeyo oo lagu xaagxaagiyo oo lagu qoro, een qoraalka geedaha wax la adeegsado intii aan hadda xasuusnaay, waa intaan ayaan ku joojinayaa, Aw-fiqiburaalow haddana dibbaan isagu soo noqon doonnaa, wax haddaan soo xusuusto; Raggii kale dhimanaay wixii ka sheegi doonan kaku soo sheegaano, waa mahadsantahay.

Fiqi Waa tahay aniga oo qabiye ah ee eriyadana caashaan bal in yar in yar baan ku darayaa, laba eray oo qurah oo xagga dhirta ku saabsan. Anigu

marka ugu horreysa dhirtu wey kala adagtahay, sidii horeba loo sheegay, oo midina waa dhir jilicsan midina waa dhir adag, saas awgeedbaa birta ruuxeedaa bir xaar iyo bar lab. Tan wax gooynaysaa ee geedka adag loo doontaa waa birta labta, wixii geed jilicsan ahna birxaartina wey goysaa, laakiin geedka maacida la yiraahdo “Maaci” ee biixida ka samaysan ee birtu ka soo booddo, waxa gooya waa bir lab. Bir-labtuna weliba Soomaalidu waxay tiraahdaa waa birta soofaha laga sameeyaa ayaa birlab la yiraahdaa, taasaa badiba godinta ama dadku u dhoortaa xataa toorreyda marka la samaysanaayo, midna markaad ku goynayso aad lafaha xattaa ku jabinayso wey soo laabantaa oo wey soo duubantaa, midina weyska sideedii, marka intaas un baan ku dari lahaa inay birtu u kala fududdahay, xaar iyo bir-lab, bal iyadoo sidaas ay tahay, bal Ciisow adiguna wixii aad ku dari lahayd oo illeyn inkastoo reer magaale aad tahay, misna aad ma argtay (halmaan hadal kuma jiraa la yiriye) waa erayo aanu xusuusanaynaaye wax qoraal ah ma aynu hayno, marka bal sidaas wixii aad ku dari lahayd bir labkaas iyo bir-xaartaas iyo dhirta maacida ah iyo dhirta jilicsan ee geed quwaaxa la yiraahdo oo haddii alla idmaayo ay doolalladu ka mid tahay ama tobaggu ka mid yahay, ama haddii Alla idmaayo xagarku ka mid yahay, kuwaasi calaashaan bir waliba wey goysaa, laakiin tamaacida bal kuwaa ee loo dooro iyo wixii aanu illowsanahayba bal xoogaa yar inooka taabo.

Ciise — Ee anigu waxaan ku daro mahaayo, waxaan u qabtay laakiin maaddaama magacayga lagu soo qaadaymeesha waa lagama maarmaan ayaan leeyahay, eray aan leeyahay inuu meesha ku jiro; idinka ayaan su’aal dib idinkugu celinayaa oo waxaan idiin weydiinayaa erayadii aanu adeesannay meeshaan hadda nmarkii la hadlayey, ayaa eray micnihiisu aanu ii caddayn inkastoo aan male awaal ahan aan u qaatay, waa erayga coldhid marka aad tiraahdeen, weelka ayaa la coldhayaa, maxaa loola jeedaa eraygaa coldhid, in lagu mataqaanaa dadka qoraya, waxaan filayaa Soomaaliga heerkaa aan ka joogno inaanay dhaafsiisnayn, marka in loo sii caddeeyaan jeclaan lahaa.

Fiqi — Waa tahay erayga Coldhidda ah inkastoo anigu aan garanayo ka jawaabi maayo, hase ahaatee bal Cabdi Dhegaweyne, yaa inoo kooneya inkastoo aanay ee hadhowto wax kaga dari doono, bal Cabdi horta aan ku celiyo.

Dhegaweyne — Waxaa weeye Fiqiburaalow; coldhidda waxaa weeye, waa la coldhay waana la xardhaywaa la coldhay iyo coldhanyahay iyo waa la coldhay gudihii baa loo sameeyay ee coldhaa la yiraahdaa taa iyo caradha labadaba waa la yiraahdaa _________ ah. Marka geedkana waa la yiraahdaa waa la xardhay iyo waa la coldhay waa isku midoo waa lagu isticmaalaa meeshaan _________, xorodho, iyo coldhidda iyo weysku mid, xorodho iyo colodho waa isku mid waa bir, godinta gudaha lagaga qoraa waa la coldhay …. Waa guda u daloolin weelka, ee korka ma leh, kor xaadh baa la yiraahdaa, ama korxaad baa la yiraahdaa oo waa laga xaadhinayaakorka, ama kor-qaadna waa la yiraahdaa, haa xaad-xaadin qaadna wa la yiraahdaayoo marka uu aan- weli uu qoraalkii buuranyahay oo dhawweyn waxaa la yiraahdaa godin buu iska leeyahay kuwaa ka roonoo saa u daabanoo aad daab gaaban leh, oo ninkaa qoraalkiisa iska sitoo iyada waa lagu faagaaoo faagid baa la

yiraahdaayoo, taasu waa yaryaraanaysaa markan kuraartaa lagu qorayo waa marka ay yareysaa, taasaa ______ ninbaa kuu dhiibayaa wuxuu oranayaa yaqaanoo horta war iisheeg! Intaa weeye intaan ka rakay.

Fiqi

Intaa haddaan Ciise kuu sii muujiyo; horta geed kasta oo la qoraayo nooc kastaba markaas weji kastaba ha ha laahaadee habkii loo rabay ayaa loo qoraa, saalkiisa iyo afkiisa iyo dhexdhexaaddiisa yaa habkii loo rabay loo wareejiyaa loona wanaajiyaa. Markaas xolodho inagoo markaas ku noqonaynaa, horta asalkeeda waa bir gudin ka samaysan laakiin ka qaab duwan oo kana daab gaaban, kana af dheer oo sidii gudinta uma af baallaarna, laakiin waxaa loola danleeyahay, inay weelkaas la qoraayo afka u weynayso, hoosta waxa ku jirana ay ka qorto oo ay dalooliso, macnaha loola jeedaa xoladho waa taas; ee waa tahay.

Bal qabtaas quraaqurta halkaa ha inoo joogo, waxaynu u gudbidoonaa wixii daab ah nooc kastaba ha ahaadee, ama wixii daab ah markan leeyahay waxaa weeye waxaa jira kuwo xrammada xaggooda ka yimaada oo samaya la yiraahdo, wixii daab ah nooc kastaba ha noqdee ama beer haloo adeegsado, ama xarago haloo adeegsado, ama dilid haloo adeegsado ama tumid haloo adeegsado, wixii daab la yiraahdo nooc kastaba ha u kala bexeene ayeynu ka hadleynaa, beertuna weynoogu xitaa weynoogu jirataaye, markaas bal imminka waxaan u gudbinayaa inuu wax inooku taabto C. Dhegaweyne.

Dhegaweyne

Fiqiburaalow mahadsanid, daabku waa fara badan yahay, ha fara badnaadee mid waxaa leh xoolo dhaqatada ______, qoraalkan ninkaan geed qoraha ah wuxuu ku jiraa xoolo dhaqatada, midna waxaa leh tumaallaada daababka, oo tumaallada daababka looguma tagomudaca iyo mindida iyo mudaaga iyo kabotolaha, iyo haddii Eebbe idankeeda leeyahay waxaasoo dhan tumaalkaa iska lahoodaabkooda qora, oo markuu tumayuu daabaa oo waa daab midna waxaa iska leh reer baadiyaha oo xattaa ninkaan qoraa qoraha ah waa ku jiraa, kan reer baadiyaha oo xattaa ninkaan qoraa qoraha ah waa ku jiraa, kan reer baadiyihi wuxuu leeyahaygudmaha iyo warmaha iyo murjiska, bahal murjis la yiraahdo oo aynu garanayno, godinta iyo warmaha iyo murjiska. Daab, wixii wax lagu daab o horta samay … iyo waran yey iska leh daab - daabna waxaa iska leh wixii wax lagu goynayo, ama mindi ha noqoto ama godin ha noqoto, ama masaar ha noqoto, ama jidib ha noqoto, wixii wax lagu goynayaa waa daab, wixii wax lagu dilayaana waa murjiskaa iyo warankaasoo waa samay; - samay baa iyaga la yiraahdaa, oo waxaa la yiraahdaa samay, marka kuwa wax lagu dilo, daabkoodu ma aha dhir oo dhir lagama qoro, ee waxaa geed iyo haddii Eebbe idankeeda leeyahay yuu u badan yahay, iyo waxaasuu u badan yahay toorrida weeye. Waxaa wehliya budh, budh wehliya aynu innagu naqaan oo dhoor caynadooda, mid ______ mid dhagax ballaaranoo _______ hore madaxa lagu suubin jiray ah, ee ninkii maalintii Daraawiishta la is dilay ee uu Koofil madaxalagu fujiyadhar qaalaa la yiraah kaa yaa la oran jiray, daabka daab gudmo iyo daab quraareedkaa iyo daab-mindiyeedk iyo kaba toleiyo daab mudac iyo daab mudaa, intaasoo daab baa jira.

Aw.Daa

Waa tahay horta daababku waa fara badan yihiinee, bil matal laba nin baa dirirayoo markaasaa nin laga adkaaday markaasaa la yiri war maxaad ninka isaga celin weyday? War ninka; wax qalaba waxaan sidanay toorrey, laakiin toorreyda daabkeedii ninkaanu dirirray baa ila

| | |
|---|---|
| | haystay buu yiri marka daabka markeynu niraahno waa magac guud, laakiin wejiyo fara badan ayuu leeyahay , laakiin waxaa mid walba ku magcaaban yahay baa la doonayaa in la yiraahdo oo saa loo kala caddeeyo, bal imminkana waxaan u gudbinayaa Salaad, bal Salaadow adiguna intii daab uu ka koobmo iyo magacyadiisa noo kala caddee. Wax ka duwan hadday jiraan weynu ka wada hadli doonnaa. |
| Salaad | Mahadsanid, Ul lama gelin sow maha? Haa! Wallahi daabka kor uun in aan daab uga aqaano maahane; daabka yaambadu waa gaar, daabka masaartuna waa gaar, daabka godintuna waa gar oo waa kala _______ waa kala duduwan yihin, daabka masaartu waa geed inta la gooyay oo madax buuran looyeelay, ee markaa dhexda laga dalooliyay la dhex geliyay weeye ( … _______ …______ …______ … ______- …) daab kaasaan u aqaannaa, daab daabbaan u aqaanaa magac kale oo gaar ah oo aan u aqaano ma jiro, (Mindida daabka leh annagu waa isticmaalnaahoo ku dar). |
| Fiqi | Ee weynu weli sii wadaynaa daababkii, daababku saynu u ogsoonnahay, qaarna waxaa laga qoraa dhir oo waa daab, nooc kastaba ha u kala duwanaadeene, samaydoodu ha kala duwanaatee laakiin waa daabo geed baa laga soo gooyaa, midna bir baa laga sameeyaa, oo tan birta laga sameeyo waxaa ka mid ah toorreyda iyo amleyda iyo wixii la mid ah, bilaawaha wixii la mid ah, waxaa laga sameeyaa bir iyo geed, geedkaasoo la yiraahdo badiba loo badiyo oo la yiraahdo waa geeska ee muxuu ahaa ee looda yaa la dubaa, marka la dubo baa la qorqoraa, googos baa lalaga dhigaa oo qurux baa laga dhigaa, haa! Ee muxuu ahaa caaradda dheer ee daabka la haystaana waa tan quruxda loogu yeelaa oo waa bir, tan isku haysaana waa bir, daab baa haddaba la yiraahdaa, markaas bal ee iyadoo sidaas ay tahay idiinna aad taataabateen, bal Xaaji Abookena wuxuu inooku dari lahaa, daab waa daab'e, hadduu nicna kale inoo raacinayo ahlan sahlan. |
| Sh.Abuu | Waa yahay ee Fiqiburaale waad mahadsantahay, ee maanta waxaan isku baroofeynaa daab, daabkii horta waa iska daab, ee si kastaba ha ahaadee raggii hortey baa soo sheegay, Wallahi waxaan u malaynaa wax ka bedelan ma jiro, daab ha ahaado, laakiin _____ , daabka, mid shooko tan lagu daabo waa daab, shookadi, qormaha qoromo tan lagu daabo waa daab, wixii yacnii la soo maray raggii baa soo maray oo waa iska daab ee waxaa kulli oo wax lagu daabointii raggii hore soo sheegi ayaan iska raacsanahay ama mindiyaha ha noqdeen intaasaan ku raacsanahay, wax hadda bedelan oo aan hadda ka bixi karo ma jiro, waa intaan la soo maro ayaan ku sii adkeynayaa, ee raggii hore soo mareen, daab midda yar yar ha ahaado, ee yaambo ka soo bilow, misaar ka soo bilow daab waa iska daab wax ka bedelan ma jiro, waa Fiqiburaale, itaasaan ku joojiyay. |
| Fiqi | Waad mahadsantahay. Waa tahay bal imminkana annagoo ka soo gudubnay hawlo waarkood oo magacyo ah bal magacyada soomaaliga siday u taqaanaa waa fara badan yahay; bal imminkana waxaynu geli doonnaa hadduu Ilaahay yiraahdo Samanyo, samanyadaa ama haku jirto wax qalab ah ama mid lagu xaragoodo ha ahaato wey fara badan yihiin illaa kor illaa hoos, bal Salaadow intaad ka xasuusantahay wax nooga taatabo. |

Salaad — Mahadsanid Xaaji Ibraahim, een horta marka ugu horeysax waxoo dhan kulli kor waa ka wada ul, ushii samanyo, markaas waa intii ama lagu xarakoodo, ama biri haku jidho oo shey birihi haku jidho, jifaa mid baa jiffo la gemiyaaoo geedka laba cayn baa loo yaqaan, murjis dadbaa u yaqaana, geedkaas keliyahaa dhowr cayn oo iyada gemiyo ushaas lagu xarakoodo ku jira yaa loo yaqaan gabdhuhu waa qaataan, ragguna waa qaataan, waa bir dhuuban oo afka intaas oo kale u shooban oo quruxsan oo dhuuban, marka waxaa la yiraahdaa smanyo, waa la yiraahdaa laakiin birtaa yaa magacyo badan loo bixiyaayoo, waxaa la yiraahdaa kii ee taraawil, een baa la yiraahdaa marka warmihii marka la gelin hayo ayagu waa samanyadii weeye, samanyadii waranka weeye, marka samanyadii warankii yaa iyadiina laba u sii kala baxay sa, midi waranka weyn oo kaalka la yiraahda yaa lagu qaataa, midna hootada weeye, oo waa kala duwan yihiin oo waa ka yar yar yihiinoo hootada waa midkooda waa loo qaataa. Hootadii haddana laba aydoo ah ayaa haddana labadii sii kala duwan yihiin, hooto dhagooleyda waa qaarkeeda, hootadaan kale oo hoota ballaadha ah murjiskaana waa ayadana waa gaar oo labadaas ayagana saas ayaa loo kala duwaa, taasi waa samayada waxaa jira ul kale oo samaya ah oo lagu haraqoodo oo wanaagsan oo raggu iska qaato ayaa jira, oo geelaa lagu kaxeeyaa, lo'daa lagu kaxeeyaa lagu kaxeeyaa, wax walbaa lagu kaxeeyaa, xataa dhulka markey roobka tahay waa lagu tijaabshaa oo waa lagu mudaa oo dhulkaa lagu tijaabshaa, taasuna waa jidhaa.

Waxaa jira marka ula kale oo ayagana isla ushii ah budh baa la yiraahdaa, mid waa madax buuran yahay, mid waxaa la yiraahdaa dhamas oo waa la xardhaayoo ninkay ku dhacdaana madax buuran oo intaas oo kale ah yey leedahay gadaalna waa ka xardhan tahay, meesha madaxa dabadiisa ahna waa ka xardhan tahay, oo taas dhamas baa la yiraahdaa. Midna budh baa la yiraahdaa oo waa ka yadhahay oo qaaliban waxaa qaata ragaa qaata dad kale ma qaato, raggaa qaata budh iyo dhamas, labadaasaan kolba anigu garanhayaa iyaguna waa jiraan; baa jira bal haddee intasaan ka garanhaya, haa; geela geela marka ulaha lagu kaxeeyo ama caruurta yaryarka ah lagu dhifto, dhowr magac baa dadku u yaqaan, mid waxay yiraahdaan waa xanjafsanaynaa caruurtaa lagu dhiftaayoo xanjaf waa yiraahdaan. Sarbi waa la yiraahdaa, xanjaf wa la yiraahdaa, sarbi waa la yiraahdaa, dhenged waa la yiraahdaa, dhowrkaas magac oo waxna geela la gu kaxeeyo waxna ilmaha yaryar lagu dhifto, waxa wuxuu aha _______ serbi**,** dhenged, xanjaf-intaas saddaxdaasba waa loo yaqaan oo qaybabkaasna waa loo yaqaan, haa waa runtaa oo qaybabkaasna waa loo yaqaan, bal haddee Xaaji Ibraahinow anigu intaasaan ku haray.

Fiqi — Waa mahadsantahay Salaad, horta eryadaas oo dhami waxa weeye erayo Af-soomaali ah hase ahaatee gobolda markeynu eegno waxaad mooddaa in ay ku kala duwan yihiin ereyada caynkaas ah, bil matal wajaantaa xaggeeda dab baaba wax kale u yaqaana oo meeshaan jidhaantan lagu yiraahdo ma aragtay ama jaamba lagu yiraahdo wajaan baa lagu yiraahdaa, dhulka qaarkiis marka ee serged meesha lagu yiraahdo serged iyo serbiba iyaduna waa isla mid serged iyo serbi; Xawr! Xawdh, xawdhi xawdhka la dhac, waa xanjafta la dhac. Erayadii baa goboladdi kala duwaya. Ee dhenged, dhengedda badiba waxay u

badantahay; hashaan dhengadee, cashaan iyaduna waxaa weeye waxaan dheegga la dhacaayo oo la leeyahay ha ku qumo. Markaasu ereyadaasu saasay calaashaan u badan yihiin waa wixii ka soo bilowda ul serged, xanjaf xawr, sarwaan haddii Eebbe idmaayo magacyadaasu ma garanaysaa waxaa jira calaashaan kuwa kale oo iyaguna fara badan oo aan hadda ilowsanahay, bal Cabdina aynu u gudubnao.

Dhega Waxaa weeya Fiqiburaalow mahadsanid. Horta rijimadu waa isu dhowwwdhowyihiin waana kal meel meel, Horta seged sebida taad tiraahdaan serged baanu niraahnaa, oo geela waxaanu niraahnaa markaanu ulayn jirnay “Shubay sararada sergadeydii iyo ____” oo sidaaseynu niraahnaa, taas weeye dhengaddii, serged beynu niraahnaa, dhengedna waa xaynu niraahnaa, waa jirtaayoo waa ______ aanu madaxyada ka goyn jirnay oo xoolahaa lagu kaxeeyaa, ulna waa la yiraahdaa, ul iyodhenged iyo serged iyo wawr iyo xowr dhuub, intaasba waa isku noocoo dhub iyo samay iyo midna ma gasho waa xoolahaa lagaga shaqeeyaa, intaa aan is daba dhigay, xoor dhuub haa, waa ul dheer oo dheer, serged xoodhuub baa la yiraahdaayo waa aniga iyo Fiqiburaale iyo afkayaga, anaa aqaanee waa dheertahay, sergadna waa midoo waa taasoo waa suubay sararaha sergeddaydii _________ . Dhengedna waa la mid, ulna waa la mid; “Oo amba dhuublaaye amab dhuubtoo dhexyaroobey dhengadey ______ “ yaanu oran jirray, markaanu xanuunjinayno, marka budhna ma aha, wax kalena maha, intaas dhengadday ka dhexaysaa. Waa dhengaddaa yaroo usha ah, ulaha ul baa ugu magac dheere, ulaha ul bey korka ka wada tahay, guud ahaan ul weeye. Ee inta kale waa faracyo ushaa ka baxay, samayna waa taqaaniinoo samay weeye oo waa murjis iyo waran wixii ku jira, waa tii _______ geed dhebi la yiraahdaan anagu u _______ waa kii ninkii ______ oo ________ cadmeed gabadha markuu amaanayey _______ lala yaab waa kii ku lahaa dhebigaasaa u samayn wanaagsan. Ulahana qaar waa ul dillaaladaa badiba smaysta oo waa ushaa madaxa buuranoo ul dilaal baa la yiraahdaa _____ waaba u sameeyaan hadday yeelaan si kalena waa ku qaataanoo kurtimada iyo lehe ay kurtimada ka gooyeenoo ul dillaal baa la yiraahdaa. Qaarna waa iskas qaar iyana la iska qaatoo oo iyana rabar loo ogyahay midi waa u dhexaysaa ul qaroor baa la yiraahdaa oo waa meel dhexe, oo ul qaroor baa la yiraahdaa, tan uu leeyahay Sallad, dhmasna waa la yiraahdaa qaarna waa la yiraahdaayoo reer muduggu dhamas buu yiraahdaa qaarna waa yiraahdaa, ul dhamas isna waa qaar iyana qaarahay ku jirtaa, iyana qaartay ka mid tahay. Kow, maxaa soo raaca, budhaka baa soo raaca, budhkaasu wuxuu leeyahay budh fadhi leh iiyo budh aan lahayn fadhi lahayn oo qardhaas leh oo qardhaas loo yeelo horta budh oo dhan qardhaas buu leeyahay, qardhaas baanu niraahnaaye, halka madaxa ka dambeysa oo isaga iiyo madaxa ay iska galaan, illeyn madax iyo ul buu burkii kala leeyahay, hlkaasaa qardhaas looga sammeyaa ma hala xardho ama yaan la xardhinee, madaxiina _______ siibanaa laga dhigaa oo waa la mud mudaa oo siibanaalaga oo loo qorayaa, ama fadhi baa loo yeelaayoo waxaa la yiraahdaa budh fadhi leh, oo budhkuna waa kaa dhirta laga qortana waa dhirtaa; qobka, cadaadda, ee dhirtaa weeye oo cayn caynka ah oo dhirta adag ah ee burdhka noqonaysa laga dhigtaa; bilcilka, geedo iyo dhir badan baa laga qoraa, laakiin qobka iyo cadaadda iyo quraca. Marka bal hadda wax kalena ma xasuusto ee

anigu wax ma qorto ee.

Fiqi — Waa tahay, waa mahadsantahay Cabdi. Bal ee waxaynu galnay samaydii; weynu gallay samaydii, weynu gallay, laakiin laba qaybood laba eray baan weli ka maqkin raaggiina, ee bal labada waan idiin xusuusinayaa anigu hadda magacooda sheegi maayo laakiin waa xusuusnahay mid waxaa weeye tan lagu xarrkoodo ee badiba laga xididdada dhirta, bil matal galoolka iyo markay saas u baxaan baa intaa la dubo marka oo weliba lagu maro mayrax lagu maro yey qurux u yeelataa, markaasaa lagu xarakoodaa afkaa laga soo laabaa midina waxaa waaye ul maranyo ….. baa lagu waxeeyaa haa! Haa! Lagu madmadoobeeyaa, haahey mayraxdaa lagu maraa. Haahey markaasay goortaa la duubo oo yey qurux badan oo midabbo leh noqonaysaa, qeysaraan baa taas la yiraahdaa waxaa jirta ul iyaduna wal wal la yiraahdo oo aan birina ku jirin ee labada af ka fiiqan oo sidii gantaal ah lagu barto inta kab meel la dhigto, ama dhagax meel la dhigto, birna ma leh, waxbana ma leh, war war baa la yiraahdaayoo waa lagu dhigma bartaa oo warwer baa la yiraahdaa, waa samanyo iyaduna, oo waa samay gooni ah iyaduna, oo waa gooni ah iyaduna ee dhirtaa lagu xarrakoodaa wey fara badan yihiinoo maxaa yeelay bil matal, markeynu intaa ka soo qaadno innagu tilmaan un beynu ka rabnaaye maxaa geli kara misna weeye, maxaa samaya geli kar?haa, haa, falaadha ruuxeedu waa tan gamuunka la yiraahdaa oo daab iyada ruuxeedu leedahay oo iyada labada gantood iyo dhexdhexaaddii oo samaydii oo kale ah weyada leh, afkiina waxay kaga jidhaa, flaadhii bey kaga jidhaa, haa bir baa kaga jidha, marka een wey fara badan yihiin, weyna farabadan yihiine bal iyadoo saas ah ee bal Xaaji Abookena intuu ku dari karo aynu u gudbino.

Sh.Abuu — Waad mahadsantahay Xaaji Fiqiburaale. Hadda raggii baa soo koobi wixii dhan soo dhameeyi kow dheh, iyadoo een wax ku kordhinaayoaniga ulaha waa guud ahaanloo yaqaan ulo, ulihii baa sii kala baxaayaan __________ ulo waaweyn iyo ulo yaryar, iyo dhowr magac magac marka ee usha waa kuwii lagu xarakoodo oo waa sidii ragga hadda la soo sheegi, wixii la soo sheegi aniga hadda wax kuma noqonaayo, bakoortua yacnii cayn cayn jaad jaad bay yihiin, ee waa ragga qaato waa lagu xarrakoodaa waa lagu shoobaa bakoortaa, waa kala namuuno, bakoor afkeeda hoose bakooro oo saas eh afkeeda iyo bakoor aad u qalloocan. Bakoorta geedaha lagu sameeyaa waa kala jaad, waa kala fiican yihiin, bakoor waxaa lagu sameeyaa isku laalaabmayso hadda ragga qaarkiisa saraha loo qaato waa jirtaa oo aad u fiican iyo bakoor oo xarrako gelaynin si loo wado, haddii waxoo adiga ku taabto iska jabayso raggaana iska qaata, wa lagu xarrakoodaa bakoorayaalka, waa kala jaad jaad, ee ulaha saasaa u kala baxaayaan. Marka ulaha saan-tan oo kale waxaa jira yacni ee ulo gaagaaban; furfurgo, tanhadda la sheegayey oo la tuuraayo, waxaan niraahnaa furfurgo, xag col ama meesha haddii tuug iyo wax xun ama cadaawe ushaasaa lagula dagaalamaa waxaana la yiraahdaa furfurgo. Waa ul gaagaaban loo samysto oo la diyaarsado, furfurdo waa lagu tuuraa waa la tuuraa waxaa la yiraahdaa waa furfurdo. Haa ayaa la yiraahdaa, furfurdo ayaa la yiraahdaa; ulahaas waa gaar.

Garuun, garrunkaas ________ aad loo fiicneeyo la qoro madaxa hoos laga weyneeyoo yacni asaga shoob ma galo, dadka maseerowgaa qaataan garuunkaas waaweyn iyo dadka meel waardiyo meelaha joogaan ayaa qaataan iyo dadka maseerowga, garruunka xarrako ma galaan, shoob ma galo garruun. Garruunkaas hor ayaa ka waaweyn yahay gadaalna waa ka dhuuban yahay. Ninkii garruunka wata waa la iska jiraa ama ninkaas tuuganimaa u wata, ama nin maseerow ah ama nin waa meel waardiye ka haayo waa la dareemaa. Haa ninkii garruunkii lagu arko dareen baa la galaa, waa la dareemaa. Haa ninkii garruunkii lagu arko dareen baa la galaa, waa la dareemaa garuunkii lagu arko dareen baa la galaa, waa la dareemaa garuunkaas ninkii wata. Waa ninkaas waa la fiirinaa saas baa loo fiirinaa, waa ______ waa nin ibtilaysan. Diyaar baa loo ahaadaa ninkii garrunka wataa, laakiin ninkii bakoorta iyo ______ iyo ku shoobayo waa ninkii ragga ahaa yacni shoobka u watoo xarako u wato weeye. Garruunka waa _____ waa ku duugan yahay waa lagu waswaasaa ninkii garruunkaa wata. Inkastoo garruunka kala yahay koo gaagaaban iyo mid waaweyn uu kala yahay, garruun waaweyn iyo garruun gaagaaban, garruun yar yarna waa jiraa oo dhallinyaro qaataan, oo usha weyn oo dadka akhyaarta iyo culimada iyo bakoorta ay iska dhallinyarada oo dareenka gelayno yar yaroo iska gaagaabanoo sidii midkaa buruska oo kale oo yaryar iska eh oo dareen ka galeynin waa iska jiraa. Waxaana qaataa dhallin yarada oo yaryar oo gaa gaaban, garuunkaas waa jiraa. Marka ulo oo loo qaato oo waa iska jiraan ee xijaab loo qaato ee dhinacaan koonfurta, waa ulo waana lagu shoobaa waana lagu xarrakoodaa waaba waaba la quraan saaraa waa xijaab. Waxaa la yiraahdaa “sabciin” aa la yiraahdaa sabciin, sabciin waa todobaatan shey aa daafacaysaa, waa ul oo sidii ul iska toosan waaye, baakoor ma aha laakiin xijaab baa loo qaataa waa la quraan saaraa, ninaa hoos; maar baa lagu samaynaa, korna waxaa lagu mudaa bir madow baa lagu mudaa, ______ waa la suubinaa, bes ee sariir baa la marinaa waa la subkaa, waxaa loo wataa yacnii shoobna waa loo qaadahaa xijaabna waa tahay, ragga qaarkiis ayaa garanaaya ulahaas xattaa gurigaa la suranaa xijaab, gurigii la suro ee bahalka ma soo gelayo ______ iyo bahalaha ma soo gelayo iyo xasharaadka ushaas gurigii la suro iska toosanoo adiga waxba mudaynin laakiin dadbaa _____ garanayaan. Shoobna waa loo qaataa, ushaas waxaa lagu samaynaa geedka lagu sameynaayo sabciin, waa ulo waa ulo la iska wato si caadi ah, bakoorna aan ahayn, waa jiraan ulahaas waa la qaataa. Ragga qaarkiis baa qaataan marka ee ulaha serbida yaryar waa la soo sheegay, serbida yacnii ilmaha lagu tumo iyo shamiiqle, shamiiqle ilmaha yaryarka dugsiileyda, dugsiileyda waxaa loo diyaarsanaa serbi yaryar oo shamiiqle eh, shamiiqle aan niraahnaa. Waxaa loo yeelaa yacnii shamiiqladaas markii la yiraahdo; shawoo! Shawuu! Waa yeeraysaa, marka saasay ku baxday wax weyn haddii dig lagu siiyo mise gacnaha lagu dhowo waxba ma aha, laakiin taasi; shawuu shawuu! Dhehaysa taas baa ka badin – aa! Aa! Ku qaylinaysa caruurta dugsileyda lagu tumaa waxaa la yiraahdaa shamiiq-shamiiqle, serbida yaryar ee shamiiqle, waa la yiraahdaa waa jirtaa serbidaasna. Een taas, canaantaas oo ilmaha lagu canaanto serbidaas aad baa ______ shamiiqdaas waa calaashaan waa oynayaan. Shamiiqdaas iyadana waa jirtaa ulahaas yar yar oo shamiiqda eh. Xoolaha kuwa lagu raaco oo

lo'da iyo eriga iyo kaasina waa ulo iska caadi ah dheer dheer laakiin, dheer dheer, ulahaas dheer dheer oo xoolaha lagu raaco dadbaa haddana ku xarbiya oo ku dagaalama, waxaa weeye dadka dhinacaan naga jiraan, masalan jiidada, garaha, een dadkaas oo xoolaha dhaqdaan aad oo dhinacaan Waamo iyo Tunida waa ulo dhaadheer oo baraf bay isu diyaariyeen, marka xattaa haddii aad hayso adiga oo seef qabto oo mindi aad haysato ulahaas … … … …

Marka ee ulahaas, ulaha waa kala yihiin ulaa jirta yacnii kor hangool laba taako eh hoosna ka qalloocan, oo ganka leh, korna lama daraf ka leh, waxaa la yiraah uleey, uleeyda reer Sheekh nuur Xuseen ayey qaataan, waxaa la yiraahdaa uleeyda reer Sheekh Nuur xuseen ayey qaataan, uleydii reer Sheekh Nuur Xuseen, waa la subkaa saliid baa loo marinaa guriga baa saas loo suraa, gurigii haddii markii _______ ushaas la arko waxaa caddaan ah waa la ogaadaa in ee ushaas uleyda ay suran tahay, yacnii dadkaan oo jameecada reer sheekh nuur X.ama ninkii usha oo lagu arko waxay calaamo u tahay inaas ka tirsan yahay jameecada reer Sheekh Xuseen, uleey baa la yiraahdaa, shoob iyo xarako ma galaan, waxaa waaye muuqashaal reer jameecanimo ay ka muuqdaan taas, waxaa la yiraahdaa uleey; een tan ay waddaadaha ay qaatan oo lagu shoobo yacni ulo madmadow oo aad iyo aad loo qoro oo dhaadheer illaa lama mitir iyo mus camal eh oo birta yaryar oo macdanta la saaro oo birtaas bi xaarta lagu googooyo korna kistoo lagu suubiyo waa waa kiraan hoosna kistoo bir yaraa loogu suraa aad loo madoobeeyo, adiga joogeeda mitir iyo nus ku siman, laba mitirna aan ahayn oo galaan waadaad yahaa qaataan aad ay ugu xarrakoodaan ku shoobaan iyakaa iska leh nin kale ma qaato, waddaad unbaa lagu tilmaamaa ninkii wato, waa calaamaddii wadaadka, maya ulahaas waxaa la yiraahdaa af aan u aqaano waa jirtaa, "Jafo" aa la yiraahadaa jafo, ulahaas madmadow oo hoosta bir uga jirto, wadaadkaa qaataa jafo aa la yiraahdaa, ulahaas saasay u kal baxaayaan ulaha, waxaa kale jira ulaha, waxaa jirta een yacnii hangool, hangool ul la qaato ma aha laakiin hangool waa u soo noqonaynaa waa xagga qalabka beeraha hangool. Ma wadaa hangool, hangool ma ku jiro. Waxaan ku soconaa hadda dhinacaan usha, ushii iyaa iyaa, haa! Hangool dad baa jiraan oo duqooshin ah iska qaataan hangoolkaas, hangoolkaa iska qaataan, calashaan waxaa weeye; waa ku taagsadaan, wixii xun oo arkaanna waa iska qadaan, hangoolkaas waa ku taagsadaan yacni hangoolkaas ul ahaan bey u qaataan odyaasha shaybka ah oo dadka u qaataa jira oo odayaal duq ah hangoolkaas waa qaataan, marka een ulihii saas bey u fara badan yohiin. Bal intii aan xusuusnahay intaan aan ku joojiyo J/lle Fiqiburaale wad mahadsantihiin. "Wasalaamu calaykum warraxmatulaahi wa-barakaatuhu".

Fiqi — Waad mahadsantahay Sh. Abooke, ee horta ereyadaas aad wada tiri oo dhami waa wax wada jira, hase ahaatee waxaan kuugu kordhinayaa usha tan aad tiraahdo sabciin baa la yiraahdaa ee waan leenahay; Waqooyi waa laga qaataa, laakiin maxaa la yiraahdaa; waxaa la yiraahdaa bil-matal, tusbaxyada marka la waxeeynayo waxaa la yiraahdaa waa tusbax haybe ah markaas een geedlaan la yiraahdo – ushaas sabciinka waa geedka wax laga gooyaa weged. Geedka

wegedka la yiraahdo ama haybe, ul haybe ah oo weged ah Sanaag bey ka baxdaa, waa ulaha madmadoow oo badiba halka kan waxaa qaataadadka la khaliifo iyo culimada mahshuurka ah ayaa badiba qaata. Waa sidaa uu u sheegayey Sheekh Abuu dhexdana taa macdanta ah baa lagu sameeyaa oo bir xaarta ah, dusha kalena ama madaxa waxaa lagaga dhigaa lacag baa laga sameeyaa. Marka xaggaa waxaa laga yiraahdaa budh-weged ah ama ul-weged ah, guriga haddii la dhigto bahal ma soo galo oo waa lagu isticmaalaa. Laakiin sabciin lama yiraahdoo waxaa la yiraahdaa ul haybe ah, ama ul weged ah ama budh-weged ah yaa laga yiraahdaa oo waxayna ka baxdaa buurta dheer ee Surad iyo siraabley la yiraahdo iyo ___________ , intaasay ka baxdaa tan kale ee ulahaa dagaalka ee bakooradaha xaggeeda ah, Cadan waxaa laga yirahdaa bakoorad raas-baraas ah, raas-baraaskaasu muxuu yahay? Waa tan midina lacagaysan midina ayan lacagaysnayn. Bakoorada culus ee ayan lacagaysnayn raas baraas baa la yiraahdaa marka waana lagu xarrakoodaa waana lagu dagaallamaa oo saasaa loogu gab oo saasaa loogu gabbadaa, oo gabbashadaasna waa, laakiin waa la iska taba baraa oo tbabar gaar ahaaneed bay leedahay. Ulahaas uu sheegayey Sheekh Abookena waan ku raacsanhayoo nimanka qaataa bil-matal; N F D Sanburyya nimanka la yiraahdo waxay yiraahdaan, dhallin yaradaasaa waxaa la yiraahdaa “il-mur” dhallinyarada tanna barbaar aan niraahno xagga waxaa laga yiraahdaa Il-mur ilmur kaasaa qaataa bahalahaa. Marbaa calaashaan birta intuu isku taago ayadoo kuu giringireysa __________ waana bir isku soo laabma qaarkood, qaarna qaarna labada af bey u dhuuban yihiin, waaba ku mudayaan, geesna waa kaga gabbanayaan waa sida Abooke u sheegay. Marka bal intaas haddii aan kaga baxo Cabdi Dhegaweynaa wuxuu leeyahay waxbaan xusuustaye igu soo celi ee marka hangoolkiina isaguna ahayd marka hangoolada tan la qaataa reer Sh. Nuur Xuseen baa leh oo iyagana laba farood baa leh gadhna leh, subkana, laakiin anigu waxay u qaataan kolley waa calaamad ka soo jeeddaa haa! Reer Sh. Nuur Xuseenna wey qaataan, magacii baa hadda iga khaldane magac bey u yaqaaniin oo ay leeyihiin magacii baa hadda madaxaygii ku wareegeysanayaa oo magac bey leeyihiin, marka taas haddii Ilaahay yiraahdo bal intaas ayaan kaga baxayaa, Cabdina wuxuu yiri hangoolkaasaan xasuustay bal hangoolkiina halkaas aynu ku joojino haddii Ilaahay idmayo, maxaa yeelay hangoolku waa laba, midna waa kaa loo haysta xagga diineed loo haysta, midna waa kan wax ku oodanna rag isaga aan wax ku oodanin laakiin xarrago u qaatana waa jiraa oo dhallinyarada ay … … _______ ma garanaysaa oo dadka xaashaan ma garanaysaa, hangoolkii xaggee jiraa, maxaa yeelay mar haddii hangoolka iyo garab-qaadka is waayaan, reerka __________ weyn looma qaado, haa! Bal anigu intaas ayaan ee bal aynu u nasanno cabbaar.

Intaa haddii aynu kaga baxno; daababkii iyo samayadii iyo haddii Eebbe idmaayo wixii raacsanaa, bal waxaynu u gudbeynaa qalabka beeraha, oo uusan ku jirin qalabka dibadda uu inooku yimid, wixii Soomaalidu haatanba ku isticmaasho ama horeyba ugu isticmaali jirtay ee beer lagaga shaqaysto ama qori ha lahaadeen ama bir ha ahaadeene. Waxaynu u gudbinaynaa si uu inooku faafaahiyo Sh. Abuuki ahlan

wasahlan.

Sh.Abuu Haa, ee Xaaji Fiqiburaale, Xaaji Ibraahim waa mahadsantahay. Si ii soo gudbiso qalabka beeraha usoo iska badneen taasaa wax ka soo taabannaa oo loo adeegsado beeraha, waxaa loo adeegsadaa ama beerta hadda ay tahy ubug, geedo goos oo hadda shaqadeeda la bilaabayo aan ka bilowno beertaas; qof baa beer loo gooyi, beertii geedo bey leedahay horta geedihii waxaa loo jaraa oo geedo goys loo adaa, waa misaarawaa la geedo gooyaa beerta, markii la geedo gooyo oo geeihii egegaan waa la soo bixinaa oo hangool baa loola tagaa waa la isu keenaa waa sidii loo yaqaan geedihii waa la isu keenaa wa la gubaa Marka beerta misaarta lagu dhameeyo oo la gubo oo ay binaanaato, waxsoo haraa geedo yar yar oo hoos eh, waxaa loola tagaa yaambo, yaambooyinka oo yaryarka ahayn oo af balballaraan oo daabkeeda ugu jirta afka hoos ka ballaaran, daabaysan ______ ku daabaysan. Misaartaba daabley ku jirtaa laakiin misaarta shaqada falista kuma jirto, yaambada yaa haddana loola tagaa cawska, beerta falin baa loola tagaa, waa la falaa yaambo yaa loola adeegsadaa, waa lagu falaa, cawska yar yar oo dhan yaamba lagu falaa, yaambada waa yaambo aad birteeda u adag, oo birtaan oo bir xaar ahayn bir lab ah oo ku jirto, misaartana saas oo kale waa lagu geedo gooyaa bir lab, marka yaambadaas aa loo tagaa aa lagu falaa, yaambadaas kolkii loo tago oo lagu adeegsado beerta la falo la dhameeyo ee la dhameeyo marka waxaa soo hari hooshii falaista yaambada haddii lagu dhameeyo qashan kuus, kuus waxaa lagu jeedaa xaaq qashinka la kuusayo waa la xaaqaa, marka cawskaas haddana hangool baa la isku soo aruurinaa la isku soo celcelinaa sidii geedihii oo kale usaa lagu shaqaysanaa haddana, waa la gubaa, marka beerta ay bannaanato oo saas loo falo maxaa ku soo hari hadana oo la adeegsadaa bertii waa kuu diyaar maxaa la bixinaa far iyo keli, waxaa lagu bixinaa yaambooyinka aan hadda sheegaayi oo kale waaweyn oo af waaweyn baa keli yar yar iyo faro yar yar iyo keli baa loo sameeyaa beerta, waxaa loo adeegsanaa yaambooyin haddana ________ tu ka kakan ka daab culus keli baa lagu samaynaa, far baa lagu samaynaa, farar yar yar baa lagu samaynaa, markii hawshaas la dhameeyo, waxaa la imaanaa beertii oo diyaar ah;Kawaabe oo isana daabaysan geed lagu daabay ah, geed geed lagu daabay ah, kawaabe, geed gaabanoo oo jiro yacni matalan saas loo soo qalloociyo oo la qoray la haanediyi baa geed oo xoog leh aa la dhex gelinaa, markaas laba xarig oo labada dhinac loogu xiraa aa la isku xiraa aa loola immaanaa, markaas kawaabigaas laba qofood aa jiidaayaan hal qof geedkii yaa qabsanaa laba qofood xariggii yaa qabsanaysaa, waxaa loo yeeli ninkaan oo geedka haysto dhulkaa saas oogu celinaa, labada qofood waxaa xooggooda isugu darsadeen calaashaan waa jiidayaan saas waxaa loogu jiidaayo waxaa loo yeelaa jibaal jibaal, fararkiina saas baa loo dhigaa, fararkii, keligiina saas baa loogu kabaabinaa, keliga yaryar far baa la yiraahdaa, saas baa lagu bixinaa, kawaawgaas la adeegsadaa, ama rag iska kaalmaystaa tagaa oo la yiraah hirin ama yacnii dad la yiraahdo dhallinyaro oo hirin mise dad weyn ha ahaato oo la yiraahdo dhallinyaro oo hirin mise dad weyn ha ahaato oo la yiraahdo macnaa dadbaa isku xirmaa, ama gamaas ama hirin ama barbaar, aa beertii ku duulaayaan aa lagu adeegsadaa, si cayoow ku dhamaato barbar baa isku xirmaa, qofba maalin baa loo tagaa, haddii beertaa

barbaartaa aan soo sheegi aan dhex galo ma dhowa xaalka barbaarta oo beerta looga calaashaan beertii waa la iskaalmaystaa, waxaa la rabaa beertaa degdag baa la rabaa, afar geed kabaabe, lix geed kabaabe, toban-geed-kabaabe aa beertaas loola adaa, beerta waa weyntahay maxaa waye, ee barbaar haloo digoo ee cambuulaa loo karsadaa, barbartii baa loo digaa, si degdeg ahaan beertii hawsheeda, ay ku fusho ee waxaa loola adeegsada, ee waa la iskaalmaystaa, afar _____ oo kabaabe aa hal maalin tagaysa, halkii kabaabeeba saddex qofood weeye, laba waa jiidayaan xariggii midna waa geedkaa ku dhegaa, geedka ku celinaa dhulka, ninkii geedka – kii celinaayi waxaa la dhahaa; kawaabiga ki dheg aa la dhahaa, ki dheg, dadkaana waxaa la dhahaa jiid iyo ki dhig aa la kal yiraahaa, hawsha saas baa markii fararkii la bixinayo, jibaal jibaal loo sameeyaa beertii, kawaawe la adeegsado, marka waxaa kuu soo hari ee waraab, beertii waa la waraabsaday, markii beertii la waraabsadaywaxaa lala kor joogaa hangool baa la haystaa osyaalka oo la wada joogaan ee badiilka haddaa noo yimid, badiil ma jirin markaas, hangool iyo yaambo aa la haystaamarkaas oo waraabka la joogo, markii beertaoo joogsaado waxaa la adeegsadaa oo beertaa la waraabiyo mise roob ku da’o oo balkii soo baxayo, yaabadii yaryarka oo kistoo fududayd aa loola ________ aa la adeegsadaa, yaambo yaryar aa loo adeegsada, markaasaa taas falow loola tagaa, waa dhammaatay, misaartii waa soo dhamaati, yaambadii waaweyn waa soo dhammaati, uaabadii kale oo fararka lagu bixiyo waa soo dhamaati, kabaabihii waa soo dhammadi; marka een warkii baan ka soo booday iga raali ahaada waxaan ka booday beertii markii la dhameeyo oo la kabbabiyo ama moos moos, moos-moos baa la yiraahdaa oo jibaal yaryar ah, sagaal lun baa gelaayaan, sagaal lun, oo waxaa la yiraahdaa moos-moos, baa la yiraahdaa, laba tilaabo oo saas ah, labo tillaabo oo saas ah, laba kale oo saas ah, waxaa la yiraahdaa moos-moos, yar yar eh, jibaal yar yar eh, ama jibaal waaweyn eh aa loo samaynaa, markii la dhameeyo waxaa la yiraahdaa ee waxaa loo adaa lun, lunkii baa ka soo boodi, waa la lumeeyaa, naagihii iyo raggiibaa is daba kacaayaan, raggii yaambada ku qodaa, abuurkii ayaa lagu ridaayaa yaambaa ku qodaayaan, raggii aa loo adeegsadaa aa lagu qodaa, oo bir adayg ku jirto bir lab oo daabkina geed eh aa lagu adeegsanaa, sidii baa beerta lagu abuuraa, markii dhammato oo biyo la geliyo ama roob ku da’o yaambo fudayd baa loola tagaaoo birta laakiin daa’in ay tahay, bir lab daabkina geed ah aa loo adeegsanaa, habeen baa loo tagaa beertii, ee beerta hawsheeda haddii la yiraahdo waa fara badan tahay laakiin hadda qalabkii la adeegsado ayaan ku jirnaa, qalabka saas baa loo adeegsafaa, yaambada yaryar _____________ ku soo mara ___________ markii la adeegsado, beertiila falo ee goyntii ay bislaato waxaa loo tagaa beertii goysmadeeda, goysmaa la gaaray, waxaa loola tagaa haddana yaambo adadeyg oo bir daab ku jirto, baa loola tagaa waa la goynaa beerta, waa la goynaa, beertii haddii la gooyo waa la isu keenaa waa la tubaa waxaana lagu adeegsadaa yaambadaas ama mid weyn ha ahaato, mar aa loola baxaa, midkii falinta yaryar eh, markii fal ay hoosha tahay yaambada waaweynaa loo qaataa, -aa loo qaataa, saas baa loo adeegsadaa, beertii saas baa laisu keenaa aa la goynaa, adiga markii la isu keeno shiiqid aa la yiraahdaa waa la shiiqaa beertii ee hoosheeda wixii loo adeegsado waa kaas _____ lagu oo bilaabi yaambo

| | |
|---|---|
| | waaweyn, yaambada yar yar oo qodid, kawaaweloo adeegsadoiyo hangool; beertii qalabka loo adeegsado iyo hangool beertii qalabka loo adeegsado hawsha saasay u soconaysaa geed goyn laga soo bilaabo ee saasaa loo adeegsadaa, intaas ayaan ku joojin lahaaye. Haddii raggii kale wax ku daraaryo, "wasalaamu calaykum waraxmatulaahiwa-barakaatuhu". |
| Fiqi | Waa mahadsantahay Xaaji Abooki, waxaa la yiraahdaa: "Kabaabe beerrey ninba waa kolkiisa". Berkee, wuxuu ka soo bilowday geedkaas cashaan kabaabaha, ee markaas waa mahadsantahay ad. ___________ haahey! ….. labada kalena ha qaado waa sidaa! Waa mahadsanatahay. Waa tahay imminkana innagoo hawshii gudaha kaga jirna hawshuna ay farabadan tahay sidaasna ayan u dhammaanaynin, bal waxaan gelaynaa laba qaybood oo mar meel isugu yimaada, marna kala magac ah, waxaa weeye kooraha, kooraha, koore-fardood ama koore-awr ha noqdo iyo koorta geela lagu xiro oo magacyo badan yeelan doonta, waxaanu markaas macnayn doonnaa; kooraha maxaa loo saameyay oo awrka rakuubka ah loogu fuulay, faraska si loogu sameeyey, maxaase raaca kooreyaasha koorta maxaa geela loogu xiray, ama xoolaha qaarkoodba loogu xiray, maxaa magacyada iyo midaabada kala duduwan ee qoraalka ku saabsan loogu kala sameeyay bal sidaas innaga oo ka amba qaadayna ee cabdiyow wax inooka taabo. |
| Dhegaweyne | Geedahaan waxaa loo xiraa magacana loogu bixiyaa koor kooraha kale ka dhawaaq weyn weeye, kooraha ninkaa geeliisa ku xidhan bey boqorkoodii tahay, geelu wuu isku dhegaystaa, koortaasuu soo raacaa, oo ogolyahay hashaas koortaas weyn ku xidhan buu kulli ogolyahay. Waa loo _________ geela kale waa soo daba yaacayaa, kooraha boqorkooda tan hasha loo xiray buuna ogol yahay, hasha loo xirayna waa hal cag dhiirranoo geela ka geesisanoo ka socod badan, dhawaaqaa caanka ahna geelu ka aacanka ahu geela kale kulli wuu kaga yaqaanoo, geelii wuu ogolyahay, waa koor geela, kooraha geela ku xiran bey boqorkoodii tahay, koortaa u weyn tan kale haddii aad meel fogba joogto ama uu lumoba oo uu geeluba kaa lumo halagu soo raacaa la leeyahay, hal carrab bey leedahay badideeda oo ________ , __________ saac ka yar caleenka la yiraahdo mid rogaal baanu annagu niraahna haddaanu halkaa nahay, waa taa laba carrab bey leedahay, waa koortaa aan aflaaqa ahayne uu afqubuurkaa leeyahay magaciisa oo rogaaloobay, rogaal baan niraahnaa ee agkeedu isu dhow yahay; rogaal baan niraahnaa, taa kalena aftaag baan niraahnaa, iyagu laba carrabley, laba laba carrab bey leeyihiin, naw, naw leh mid aanu mar mar niraahnaayoo taa ma aragtay aftaagta iyo mid mid qaylo dheer baa ku jirta naw naw leh baanu niraahnaaye naw-naw-naw! Meel fog baa laga maqlayaa, tan bordaanta oo kale ah weeye oo taas haddii aad meel fog geela ku xereysan yihiin oo aad raadinaysay hadduu kaa lumo hashii oo ay ku xirnayd geelii lunsatay. Bodaantaana waa lagu raadiyaa. Boodaanta saasaa loogu xiray geela oo sababtaasaa loogu xidhay. Kan caleenka ah waxaa loogu xidhay nirgaha iyo waxaa nirgaha geelu habeenkii yaa lagu xidhaa maxaa loogu xidhaa geelii habeenkii markad guureysiinayso hashii wey istaagaysaa nirigtii baa jaqaysa gondhinaysa, waana gudcur arki maysid. Niigtii dee hashii bey jaqaysaayoo waa is ruxaysaa oo waa gujinaysaayoo waaisruxaysaa oo waa gujinaysaa oo |

wey jaqaysaa, marka markii aad istaagto haddii hasha aleenku ku xiran yahay oo koor hashu ku xirantahay shanqwri mayso hashii waa godlan tahay oo koortu saan weeye. Dhulkuna libaax iyo bahal buu leeyahay, hashii halkii baad ku dhaafaysaa, nirigtii haddaad ugu xidho, nirigtii baa ______ dhalow, dhalow, dhalow bey kaga siinaysaa oo hasha laguma xidhee nirigtaa lagu xidhaa caleenta. Marka waxaanu oran jirnay, aleen ______ aleen ________ Marna waxaanu oran jirnay sidii; "sidii inan weynoo or loo tumay ogadee; _________ iyo aleenkaa jiray marka anigu kooraha intaan ka garanayo kuwa geela horta caynkaa weeye, magacyadooduna saasaa loogu kala bixiyay. Waxaase aanu ka daweyn jirnay;…… , hii, hii!!! (... ... ... ... ?) Waxay ku fadhidaamid qarkeeda hoostana waa ka cildhantahay rogaal, afkeedana waa qoolaabadeysan yahoo waa isku soo dhow yahay oo marka hore la qoraayo yaa dib fiiqan inta loo yeelo labada dhanba laga soo fooraariyaa. Rogaalku markaasaa meel yar laga coldhaa. Afqaagtana dhexdaa qumaati loogu coldhaa oo labada af bey laba fayoo taagan ku leedahay, waana un isku mid.

Fiqi — Waa tahay intaa haddaynu kaga baxno uu cabdi inoo sheegay bal waxaynu u gudbinaynaa Salaad.

Salaad — Mahadsanid Ibraahim, horta koorihii marka hore waa koor, laakiin waxaa ku jira wax macne ah meeshii dadku waa tuu Soomali yahay, waagii hore oo dadku waad ogtihiin een sidaan hadda dadku u ilbaxay dadku uma ilbixin. Yacni kooraha macnaa ku jira oo shanta koorood oo kala magacyada leh macnaa ku jira. Koortaan halka qori leh oo yacni dadka kooraha weyska samaysan jirayookoor waa la wada samayn karaa oo middii uun dhawaaqdaba geelii dhawaaqeeda waa la maqli karaa laakiin macnaa meesha ku jira. Koortaan dhoodaanka la yiraahdo oo halka qori loo sameeyo oo dhawaaqa weyn leh oo kooraha ka dhawaaq weyn leh, macnaa ku jira oo; war nimaan geel badan lahayn ma samaysto mana qato geeliisana laguma xiro oo ayagu macnaheeda waxaa weeye, ninkaa geela badan leh oo geel badane ah yaa xirtaa oo ninkaa hebeloo waa geel badan yahay oo geeliisu; waa la oran jiray oo waa lagu faanin jiray oo koortaasi boodaanka ah ninkaasi nin aan ahayn ma qaadan jirin oo koortii boodaanka la yiraahdo.

Koorta kale oo ayaduna la yiraahdo guudaanka ayadana la yiraahdo ayadana macnaa ku jiray oo ninka geela wanaagsan leh oo geeliisu qoodha yahay oo la yiraahdo rattigiisa ama la soo raads do ama hashiisu la soo raadiyo oo la yiraahdo hashaas geeliisa firkiisa hala soo raadiyo, yaa ayadana qaadan jiray oo ayadana; haa, wey ka yartahay oo boodaankey oo boodaankey ka ______ oo ninna waa geel badni wixii loo ... ... , ninna waa qoor iyo qurux yuu ku qaadan jiray, middaan aleenka la yiraahdo, waxay ahayd aydana dee ilmaha yaryaroo aan koorta qaadi karinoo oo geela waaweyn aan xoog la ekeyn oo yaryarkaas yaa lagu xiraayayoo yacnii sidii geela docday ka mareen iyo docday kaga jiraan iyo middii habarta nuugeysay habarta iyo sida lagu raadiyo iyo middaa yarta ah oo dhelaha yey qaadan jireen oo aleel baa la yiraahdaayoo waa yadhahay oo ayadana saasay u qaadan jireen, labadaan kale geelaas oo yaacdadaas ahoofaraha badan baa lagu xiran jirayoomidna waxaa u badan degaankay kuwaas degaankey raacsan yihiinoo, midina koonfurtey i middaan afqubuurtaan la yiraahdo soo raacsanatahay aftaagtuna waxay soo raacsan tahay waa degaanka oo

waa xaggaa woqooyiga ah, geelaas yaacdada ah bey labadooda oo fara badan leh een hasha tii toban lagu xiri karo haddii labaatan loo heli karo, saasaa loogu xiraa, haliba intay hal ka dhib badan tahay ama geela ay ka baxdo iyo saasaa loogu xiri jiray anigu intaasaan ka garanayaa geedaha laga qoro? Kooraha marka waxaa laga qoraa; geedo badan baa laga qoraa, lebiga waa laga qoraa, geed lab baa laga qoraa iyadu geed jilicsan wax kuma laha, geed adag baa laga qoraa geedka lebiga la yiraahdo waa laga qoraa, geedka la yiraahdo himirka waa laga qoraa; Himirka lo' kooraha iyadaa laba ahelo'daa u badan, geedka himirka la yiraahdo iyadaa u badan, geed la yiraahdo, ______ anigu ma _______ waxaan u malaynayaa inuusan aqoonin ninka la yiraahdo, uusan aqoonin Fiqiburaale inuusan aqoonin baan u malaynayaa, ________ waa laga qoraa, raydab waa laga qoraa, goosay waa laga qoraa, goosagaad aad u taqaaniin, waa laga qoraa, garaska waa laga qoraa. Laakiin waa foolxuntahay koortiisu, garaska aad bey u foolxuntahay, jillaaf miiran bey noqotaayoo lama jecla oo garaska lama jecla koortiisa oo waa laga qoraa, ee geedka la yiraahdo haa gunray geed la yiraahdo oo wax ka koor quruxbadan, oo asaguna lo'duu u badan yahay oo wax ka qurux badan. Waa laga qoraa aahey, geed kale oo la yiraahdo _______ waa laga qoraa, lakiin waa jilicsanyahay geedkiisu oo lama jecla oo geedkiisaa xoogaa jilicsan, asagana lama jecla. (waxaan ku weydiinayaa, midda labada carrab leh, ma laba magac bey kala leeyihiin _______ ?) maya, laba magac bey kala leeyihiin, koorta halka qoriga keli ah, halka midda keligeeda leh quttool baa la yiraahdaa, midda kalena laba carrabley baa la yiraahdaa _______ , baa la kala yiraahdaa, hal sax waa qumantahay! I xasuusi, (... ... ...), (... ... ...) baa la yiraahdaamarka horta kooraha geedaha laga qoraana anigu geedaha aha laga qorana intaasaan ka aqaanaa, ayadana macnahaas yaan u fahamsanahay oo anigu aan ku arki jiray ama aan u fahamsanahay. Oo oo midba in ujeedda leeyahay wax kasta oo la waxeeyo ujeedday leeyihiin, ujeedaddeedu labadaan midna waa sida aan iniiku sheegay, bal hadda intaasaan u deynayaaye Fiqiburaalow mahadsanid.

Fiqi — Waa tahay horta markeynu sheegno kooraha ee waxaad mooddan inay isku dhow yihiin kooraha marka waxaa aeeye koore, koore iyo koor marka hore, laakiin markey isu immanayaan oo jamac noqonayaan kooreyaal yey isugu immanayaan labadii, marka bal horta inaynu saa u kala soocno; (kooraha waa loo baahan yahay) haa, koore iyo koor aynu saa u kala soocno, oo markeynu koorta ka sheekeynayno koor ay ahaato; markii aynu koore ka sheekeynaynuna koore ahaato, laakiin markeynu niraahno kooraha, kooraha niraahno, koorihii weynooku jiraa Af-Soomaaliga markeynu eegno, koorihiina waa ku jiraa, haa waa ku jiraa waa kow. Markaas ba intaas haddii anigu aanan waxba ku sii darin, waxaan u gudbinaa Xaaji Abooke.

Sh.Abuu — Waa mahadsantahay X. Fiqiburaale, aniga hal shey in aan ku darsado oo anigoo Sheekh Aboo eh. Kooraha oo bahalka geelisha loo xiro, waa tii raggii soo sheegeen, marka aniga reer geel mihi, laakiin waxbaan ku daraa, geedaha lagu qoro sida aan ogahay ayaa ku darayaa koorta, koor-geel, ee waxaana geedaha u fiican hadda unuka aan naqa anno

waxaa la yiraahdaa; dhaydhayel geedaha oo baraanbaro e, lagu qoro ee dhaydhaykaa la yiraahdaa, dhinaca Aalti-Jubba dhinaacaana ki baxaa, dhaydhaynaa la yiraahdaa oo koortina ku fiican yahay. Kuwaan kale waa sidii la yiri ee ______ geedo fara badan baa laga qoraa, laakiin dhaydhaylahaas aad buu u fiican yahay, iyo geedo kale oo geed macsaro laga qoraayo usuuna waa fiican yahay geedkaan oo sisisnta lagu _____________ geedka lagu qoraayo oo geed waaweyn oo lagu qoraayaa jira. Geedahaasna kaas waa ka fiican yahay, koortii laga qoro aad baa u fiican tahay aad baa u dhawaaqaysaa oo u yeeraysaa. Koor waa tii la sheegay yacni koor geel, kooraha wixii koor la yiraahdo, yacni koorta haddana annaka si gaar ah waxaan u naqaannaa koorta, saasaan u aqaan usuuna koorta haa! Saasna waa u naqaan mid yar eh oo dhaqaaqayninna waa jiraa, ee middan oo caan eh oo _______ dhexda waa lagu yiraahdaa _________ laakiin midda oo yar oo dhawaaqaynin calaamo koor calaameed geedka loo xiro, waa jirtaa oo geedo la qoro eh, taas intaas aan ku daraa ee waan ka baxay.

Fiqi

Waa tahay, ee horta koorta dhirta laga qoro markeynu u noqonno, dhirta wey kala jirtaayoo, dhirina waa geed nugayl, dhirina waa geed lab. Marka had iyo goor waxaa loo ______ dhirta geed ka labka ah; waxaana loogu dab leeyahay koorta laga qoraa geed labka waa ka dhaawaaq dheer tahay tan kale, oo wey ka qaylo dheertahay, ee haddii ayan dillaacinna wey raagtaa, aad bey u raagtaa, bil matal budhka laga qoro galoolka ama cadaadda laga qoro haddaan la marin marka hore xayo oo madaxa laga qoro haddaan la marin marka hore xayo oo madaxa laga marin qarraraa oo waa dilaacaa, koortuna haddii ay geed lab tahay oo aan xaydhaa marka hore lagu subkin oo ay qorraxi hesho, wey dillaacaysaa. Marka badiba waa la _________ marka aad doonayso marka wakhti colaadeedka ay tahay koorta ama waa laga furaa ama cuf baa la geliyaa, si ayan koortaasu u dhawaaqin, haa (… … …) cafuufkaas ama cabayntaa la cabbaynayo oo cawskaas laga buuxshay waxkastaba halaga buuxshee macnaha waxaa loo danleeyahay yaan la maqlin, waa markey colaadda tahay, marka kan koorta geela lagu xiraayona laba xaaladoodba waa loogu xiraa mar qurux waa loogu xiraa, oo geelaan koor lahayni ma hagaagsanee waaba laysugu faanaa, marna waa loogu xiraa had iyo goor geelaas baaqiisa iyo hasha orodka badani baxsata had iyo goor, yeyan hashaasu adoon ogeyn meel ayan ka dusin oo koorteedaasaa la dhegaystaa iyadana, marka horta koorta sida loo xiraa caynkaas oo kale waaye. Marka waxay ila tahay weli waxaynaan u gudbin xaggii kooraha? Haddaynu hadda ka hadleyniyo haddaynu dib u dhiganaba, bil matal waxaa la yiraahdaa dawan, waxaa lagu xiraa isaguna koortuu ka mid yahayoo, waxaa lagu xiraa fardhaha laakiin oo dawan baa la yiraahdaa, birna waa ka samaysan yahay, wax yar oo carrab yarna waa leeyahay, dhalow, dhalow dhalow, quruxna waa leeyahay. haa! Halka kan xitaa ma aragtay xittaa dameeraha waa lagu xiraa oo qurux baa loogu xirtaa. Kuwaan ama xataa halla fuulo, ama ee magaranaysaa si kastaba ha ahaatee, koortii buu ka dhigan yahay laakiin wixii gammaan ah yaa lagu xiraa oo geelu wax kuma leh (… … …) haa! Marka iyadoo saas tahay ee inaynu intaas ku joojino waana soomaanahay, ee cabdi baa yarehe gacanta taagaya bal intuu inooku

dari lahaayunu eegno.

Dhega

Koorta, koorta laba geed baa; koortii baan ku noqonaynaa laba geed baa u qaylo dheer- maya, koor meel ay joogtaba marka la isu keeno yucubkaa u qaylo dheer, koor yucubi koo la qaylo ah la arki maayo, waana ka jabi ogyahaayo isaga iyo lebigaa horta koor u haysta, laakiin koorta lebigu waa adagtahay, beriba beriga ka dambeysana qaylada waa soo kordhinaysaa, xittaa markey dillaacdee _________ ay qonashka la yiraahdo qon, qon, qon! ___________ mid kasta dhoonta laakiin koorta yucubku ( ... ... ... ... ) waa jabi ogtahay, laakiin qaylo laguma hayo, xagarguna waala midoo aad buu u qaylshaa, waana jabi ogyahay isagu, laakiin aad buu u qaylshaa, labadaa geed baan yaanu isku ______ jiray koorta, lebigu waxaa weeye raasumaal!, koor lebi waa __________ aad baa loogu xiisaa, waana la isku dilaa, waqooyi bari dhoweyd waa tii la isku dilay ... ... ... ...